



# TARTANKA QORAAL CILMIYEEDKA 18AAD GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS EE JAAMACADAHA BARRIGA AFRICA

## SU'AAL

Sanadihi ugu dambeeyay dawladaha caalamku waxay wajahayeen khatar muuqata oo uga imaanaysay shakhsiyaad iyo kooxo hubeysan oo aan dawli ahayn kuwaas oo maciin bidey falal argaggixiso . Iyada oo laga falcelinayo arintaas, dawladaha iyo ururada caalamiga ah waxay si kororsiimo leh u diyaariyeen shuruuc ama tallaabooyin adag oo looga hortagayo falalka argaggixiso...

Guddiga caalamiga ah ee Laanqayrta (ICRC) waxay cambaaraynaysaa falalka argaggixiso iyada oo aan loo eegaynin cida samaysay falalkaas in ay qayb ka tahay colaadaha hubaysan iyo in kale. Sidaas si lamid ah ICRC waxay ka welwelsan tahay natiijoyinka bani'aadamnimo ee ka dhalan kara hawl-galada la dagaalanka argaggixisada. ICRC waxaa welwel galiyay fikradaha khaldan ee had iyo jeer laga haysto ama laga aaminsanyahay sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada taasoo ah in aan lagu dabakhi Karin ama qaab la badalay loogu dabakhi karo shakhsiyaadka iyo kooxaha loo aqoonsaday in ay argaggixiso yihiin iyaga iyo qoysaskooda. sidoo kale ICRC waxay ka welwelsan tahay xaqiiqada ah in xeerka ciqaabtu uu danbi ka dhigayo nooc walba oo taageero ah oo loo fidiyo shakhsiyaadka ama kooxaha argaggixisada ah arintas oo hor istaagtay in si eex la'aan ah gargaar loogu fidiyo kuwa ay dhibaatooyinku soo gaadhaan."

*(waxaa laga soo xigtay warbixinta haayada ICRC 2019 oo ku saabsan sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo caqabadaha colaadaha hubaysan ee casriga ah).*

Si taxaddar leh u falanqee oo uga hadal caqabadaha ka hor yimid sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada (IHL) xiliyada ay socdaan hawl-galada looga hortagayo argaggixisada.

## TILMAAMAHA

- Tartanku wuxuu u furan yahay dhamaan ardayda Jaamacadaha Bariga Afrika ee heerka koowaad.
- Qoraalka (essay) waa in kumbuyuutar lagu qoraa, raad raac iyo qaab sax loo sameeyo, , sidoo kale waa in uu lahaadaa qayb u gaadh ah raad raaca (Bibliography).
- Qoraalku waa inuusan ka badnaamin 4000 oo eray (iyada oo ay ku jiraan qoraalada muujinaya raad raaca ee bog walba hoos ka muuqda ( Foot notes) laakiin ay ku jirin boga gaadhka u ah raad raaca (Bibliography).
- Qoraalka (esaay) oo uu ku lifaaqanyahay nuqulka aqoonsiga ardayga waa in uu soo gaadhaa xafiiska guud ee haayada ICRC kuna yaalla Nairobi ugu dambayn 14 August 2020 waxaana lagusoo hagaajin doonaa emailkan: nai\_com@icrc.org codsiyada lasoo diro mudada kor ku xusan kadib lama aqbali doono.
- Ku guuleystaha tartankani wuxuu heli doonaa kafaalaaqaad si uu uga qeyb galo cilmi kororsi ku saabsan Sharciga Caalamiga ah ee Bani-aadamnimada iyo abaalmarin lacageed. . waxaa kale oo jiri doona abaal marino la siin doono labada qofood ee kusoo xiga iyo kuwo kale oo la xiriira qoraalada ugu wanaagsan wadan kasta.

## HAGAHA QIIMAYNTA

Ka qayb galayaasha waxaa lagu qiimayn doonaa sida ay dood macquul ah ula yimaadaan, sida xeesha dheer ay jawaabaha u bixiyaan, qaabka ay usoo bandhigaan aqoonta ay u leeyihiin mawduuca laga hadlayo, halbeegyada kor ku xusan oo dhan waxay yeelan doonaan qiimayn u gaadh ah:

Aqoonta ay u leeyihiin mawduuca laga hadlayo	Fikirka Xeesha dheer	Qaabka soo xigashada raad raaca	Total
40	30	30	100

## Faahfaahin dheeri ah kala xiriir:

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas,  
Waxda Warbaahinta, Ergada Soomaaliya,  
House #01185, Zone A, Halgan village, off Jimcale Road, Garoowe, Puntland Soomaaliya  
Tel: 05844110 ama Mohamed Khalif +252907948803  
Email: mkhalifibrahim@icrc.org  
www.icrc.org

ICRC